

ILAALINTA IJAARTAHA QAARKOOD OO JOOGSANAYSA KA DIB JUUN 30, 2022

La cusbooneysiyaay Juun 30, 2022

Tan iyo Luulyo 1, 2021, ijaartayaashu waxay awoodeen in joojiyaan iska saarida guryaha ee la xiriirta bixin la'aanta lacagta ijaarka iyaga oo mulkiyaashooda guryaha siinaya caddeyn qoraal ah oo sheegaysa in ay codsadeen taageerada dhanka ijaarka. Haddii caddeyn la bixiyay **ka hor inta** uusan mulkiilaha gurigu gudbinin kiiska iska joojinta ijaarka, mulkiilaha guriga looma oggolaanin in uu gudbiyo kiiska iska saarida guriga ilaa codsigu yahay mid aan hadda ka dib go'aankiisa la sugayn, ama ilaa laga gaarayo Oktoobar 1, 2022. Haddii caddeyn la bixiyay **ka dib inta** uusan mulkiilaha gurigu gudbinin kiiska iska joojinta ijaarka, maxkamaddu way joojin doontaa kiiska ilaa laga gaarayo Oktoobar 1, 2022, ama codsiga laga ogolaaday ama la diiday. **Ka dib Juun 30, 2022, bixinta caddeyn codsi oo loogu talagalay taageerada dhanka ijaarku joojin mayso dacwada maxkamadeed ee iska saarida guriga.**

Ka waran haddii aan dokumenti/qoraal siiyay mulkiilaha gurigayga oo ah in aan codsaday taageerada dhanka ijaarka muddo ku beegan ama ka horreysa Juun 30, 2022?

Waxaad tahay qof weli la ilaalinayo 'protected' ilaa laga gaarayo Oktoobar 1, 2022, ama ilaa codsigaagu yahay mid aan hadda ka dib go'aankiisa la sugayn. Qorshee in aad aado taariikh maxkamadeed kasta oo kiiskaaga u dejisan. Haddii aadan ka soo muuqan dhageysi maxkamadeed ee kiiskaaga, xukun ah iska saarida guriga ayaa la gelin karaa oo adiga kaa dhan ah.

Haddii bixiyaha taageerada dhanka ijaarku uu bixiyo qaddarka lacageed uu mulkiilaha gurigaagu ku codsaday ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee bixin la'aanta lacagta ijaarka ka hor Oktoobar 1, 2022, kiiska iska saarida guriga oo kasta oo ku saleysan ogeysiintaasi waa in meesha laga saaraa. Haddii bixiyaha taageerada dhanka ijaarku diido codsiga, ama bixiyo lacag ka yar qaddarka ku qoran ogeysiintan, kiiska waxaa la oggol yahay in uu hore u sii socdo waxaanad halis ugu jirtaa in guriga lagaa saaro. Mulkiile guri wuxuu sidoo kale ku siin karaa ogeysiin cusub haddii aad weli la soo daahsan tahay/dib uga dhacsan tahay ijaarka ka dib marka codsiga taageerada dhanka ijaarka lacagtiisa la bixiyay ama la diiday.

Haddii aanan dokumenti/qoraal siisin mulkiilaha gurigayga oo ah in aan codsaday taageerada dhanka ijaarka muddo ku beegan Juun 30, 2022, waa maxay is ilaalinta weli i khuseysa aniga?

Hay'adaha Waxqabadka Bulshada oo badan ayaa weli taageerada dhanka ijaarka siinaya ijaartayaasha. Booqo 211info.org si aad u hesho bixiyaha taageerada dhanka ijaarka ee degaanka, oo isla markiiba codso. Iskasta oo mulkiilaha gurigaaga aadan ku qasbi karin in uusan ku degdegin iska saarida guriga haddii aadan mulkiilaha gurigaaga ku siinin codsigaaga muddo ku beegan Juun 30, 2022, haddii aad codsato taageerada dhanka ijaarka waxaa dhici karta in aad mulkiilaha gurigaaga ku qanciso in uu kugu raaco joojinta in nidaamka iska saarida gurigu in uu gudbo. **Intaasi waxaa dheer, ilaa laga gaarayo Oktoobar 1, 2022, haddii adiga, bixiyaha taageerada, ama qof kasta oo kale bixiyo lacagta uu mulkiilaha gurigu ku codsaday ogeysiinta ka hor inta aan xukunka la gelin kiiskaaga, mulkiilaha gurigaaga waa in uu meesha ka saaraa kiiska.** Tani waxay ka dhigan tahay haddii codsiga taageeradaada dhanka ijaarka hawshiisa la qabtay ka hor inta aysan maxkamaddu gelin xukun ah iska

saarida guriga oo adiga kaa dhan ah oo mulkiilaha gurigaagu helo lacag bixinta qaddarka lacageed ee lagu sheegtay ogeysiinta, waad ku sii jiri kartaa gurigaaga.

Waa maxay isbeddelada kale ee dhaqan galaya Juun 30, 2022?

Ka dib Juun 30, 2022, mulkiilayaasha guryaha hadda ka dib loogama baahna in ay bixiyaan macluumaad ku saabsan xuquuqda aad u leedahay in aad joojiso iska saaridaada guriga adiga oo codsanaya taageerada dhanka ijaarka oo qayb ka ah ogeysiintaada iska joojinta ijaarka.

Sidee baan u helaa caawimaad dhanka sharciga ah?

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qareen kala hadasho xuquuqda aad leedahay, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala

<https://oregonlawhelp.org/find-legal-help>. Haddii aad leedahay kiiska maxkamadda ee iska saarida guriga oo go'aankiisa la sugayo, waxaad Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga ka wici kartaa 888-585-9638. Waxaad sidoo kale Adeega Gudbinta Qareenada Gobolka Oregon kala xiriiri kartaa (503) 684-3763.